



Qaxootiga dhowaan yimid - waxa aad u baahan tahay in aad ogaato aadna sameynayso

Waxaan bixinaa lacago iyo adeegyo kaa caawinaya inaad la qabsato nolosha Australia. Waxaa jira waxyaabo ay tahay inaad sameyso si aad u sii hesho lacagtaada, waxaan ugu yeernaa waxyaabahaas mutual obligation requirements (shuruudaha waajibaadka labada dhinac ah).

Waa kuwan qaar ka mid ah macluumaadka muhiimka ah ee aad u baahan tahay inaad ogaato:

- Waxaad u baahan tahay inaad noo sheegto wixii isbeddel ah ee ku yimaadda xaaladahaaga.
- Inta lagu guda jiro 12-ka asbuuc ee ugu horreeya laga soo bilaabo taariikhda aad timid Australia, waxaa helaya in lagaa dhaafo mutual obligation requirements (shuruudaha waajibaadka labada dhinac ah) si lagaaga caawimo la qabsiga wadanka.
- 12 isbuuc ka dib, waan kula kulmi doonaa si aan u samayno Job Plan (Qorshe Shaqo). Taas Job Plan (Qorshe Shaqo) waxaa qeyb ka ah hawlo ama waxqabadyo ay tahay in aad samayso si aad u hesho lacagtaada. Waxqabadyadaas waxay kaa caawin doonaan inaad la qabsato nolosha Australia. Waa inaad tagtaa ballantaan, ka bacdina waa inaad si joogto ah warbixin u siisaa Centrelink. Haddii aadan samayn taas, waxaa laga yaabaa in lacagtaadu joogsato.
- Inta badan uma baahnid inaad shaqo raadsato ilaa aad Australia joogto 12 bilood.
- Ballan ayaad nala samaysan doontaa markaad Australia joogto 12 bilood ka dib. Ballantaas, waxaanu hubin doonaa xaaladaada waxaanu kuu gudbin doonaa hey'adaha bixiya adeegyada shaqada si ay kaaga caawimaan sidaad u raadsan lahayd shaqo.
- Dadka qaar ayaa loo gudbiyaa hey'adaha shaqada 12 isbuuc markay dhamaato ka dib. Haddii taasi dhacdo, waa inaad tagtaa ballamaha oo aad kala xaajooto hey'ada shaqada Job Plan (Qorshe Shaqo) haddii kale waxaa laga yaabaa in lacagtaadu joogsato.
- Waxaad xilli hore codsan kartaa in lagu gudbiyo hey'ad bixisa adeegyada shaqada haddii aad rabto in lagaa caawiyo sidii aad shaqo u heli lahayd.
- Inta aad lacag naga qaadanayso, waxaa loo baahan yahay inaad noo soo sheegto haddii duruufahaagu isbeddelaan maadaama laga yaabo inay saameyso lacagta aad qaadata. Waa inaad sidaas sameysaa 14 maalmood gudahood marka isbedalku dhaco. Nala soo socodsii:
 - haddii aad bedesho meelaha lagaala soo xiriiri karo
 - haddii aad bedesho address kaaga
 - haddii aad kala tagtaan lamaanahaaga ama aad yeelato lammaane cusub
 - haddii aad bilowdo ama aad joojiso daryeelista caruur, taasna waxaa ka mid ah ilmo aad qorsheynayso inaad dhasho
 - haddii aad qabato wax shaqo ah oo ay lacag kaasoo gasho
 - haddii aad xanuunsan tahay, dhaawacan tahay ama aad naafo tahay.

Si aad u sii hesho lacagtaada labadii todobaadba mar, waa inaad samaysaa waxqabadyada lagu heshiyay aadna tagtaa ballamahaaga. Haddii aadan tagi karin ballan aad Centrelink la leedahay, waxaa loo baahan yahay inaad isla markiiba noo soo sheegto si aan ballan kale kuugu samayno.

Waa inaad si joogto ah u soo warbixisaa si aad noogu sheegto inaad samaynayso waxqabadyada lagu dejiyay. Waan kuu sheegi doonaa inta jeer ee aad u baahan tahay inaad warbixin na soo siiso. Warbixinta waxaad ku soo gudbin kartaa adiga oo soo wacaya **131 202**, ama tagaya service centre (xarun adeeg) ama isticmaalaya akoonkaaga Centrelink ee ku xidhan myGov.

Waxaan kuu soo diri doonaa warqad haddii aan macluumaad kaaga baahanahay. Waxaan warqadda kusoo diri doonaa address kaaga ama myGov akoonkaaga. Waxaad haysataa 14 maalmood si aad noogu soo gudbiso macluumaadka ama waxa laga yaabaa inaan joojino lacagtaada. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo inaad fahamto warqadda, waxaad naga soo wici kartaa **131 202**.

Marka aad bilowdo inaad bixiso kiro, waxa laga yaabaa in aad heli karto Rent Assistance (Kaalmada Kirada). Tani waa lacag dheeraad ah oo kaa caawinaysa kharashaadka kiradaada. Waxaan ku weydiin doonaa inaad noo keento caddaynta qiimaha kirada aad bixiso. Waxaad noo keeni kartaa lease agreement (heshiiska kirada) ama waxaad buuxin kartaa Rent Certificate (Shahaadada Kirada).

Wixii macluumaad ah ee intaas dheer, wac **131 202** si aad noogula hadasho Soomaali wixii ku saabsan lacagaha iyo adeegyada Centrelink. Waxaad sidoo kale booqan kartaa service centre (xarun adeeg).



Newly arrived refugees – what you need to know and do

We have payments and services to help you settle into life in Australia. There are things you must do to keep getting your payment, we call these mutual obligation requirements.

Here is some important information you need to know:

- You need to tell us about any changes in your circumstances.
- During the first 12 weeks from the date you arrive in Australia, you will be given an exemption from mutual obligation requirements to help you settle into the country.
- After 12 weeks, we will meet with you to make a Job Plan. This Job Plan will have activities that you must do to keep getting your payment. These activities help you settle into life in Australia. You must go to this appointment, and after that you must report to Centrelink regularly. If you don't, your payment may stop.
- In most cases you do not need to look for work until you have been in Australia for 12 months.
- You will have an appointment with us after you have been in Australia for 12 months. At this appointment, we will check your circumstances and refer you to an employment services provider to help you look for work.
- Some people are referred to a provider after the 12 week exemption. If that happens, you must attend appointments and negotiate a Job Plan with the provider or your payment may stop.
- You can ask to be referred to an employment services provider earlier if you want help to find work.
- While you are getting a payment from us, you need to tell us if your circumstances change as it may affect your payment. You must do this within 14 days of any change. Let us know if you:
 - change your personal and contact details
 - change your address
 - separate from your partner or have a new partner
 - start or stop looking after a child, including having a baby
 - do any paid work
 - are sick, injured or have a disability.

To keep getting your payment every fortnight, you must do the agreed activity and go to your appointments. If you cannot go to a Centrelink appointment, you need to let us know straight away so we can make another appointment for you.

You must report regularly to let us know you are doing your activities. We will tell you how often you need to report. You can report by calling us on **131 202**, going to a service centre or using your Centrelink account linked to myGov.

We will send you a letter if we need information from you. We will send the letter to your address or your myGov account. You will have 14 days to give us the information or we may stop your payment. If you need help understanding the letter, you can call us on **131 202**.

When you start paying rent, you may be able to get Rent Assistance. This is an extra payment to help with your rent costs. We will ask you to give us proof of how much rent you pay. You can give us a lease agreement or fill in a Rent Certificate.

For more information, call **131 202** to speak to us in your language about Centrelink payments and services. You can also visit a service centre.